

Wasiirka Maaliyadda Soomaaliya ayaa kulan looga hadlayo horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha dalka magaalada Nairobi kula qaatay Bangiga Horumarinta Africa Sep 30, 2015

Wasiirka maaliyadda Xukuumadda Federaalka Soomaaliya mudane Maxamed Aden Farkeeti ayaa saaka dib ugu soo laabta magaalada Muqdisho, kadib markii shir looga hadlayey horumarinta kaabayaasha dhaqaalaha dalka magaalada Nairobi kula soo qaatay Bangiga Horumarinta Africa.

Wasiirka ayaa saaka markii uu ka soo dagay garoonka diyaaradaha Aden Cade saxaafada kula hadlay ayaa faahfaahin ka bixiyey kulankii dhex maray Wasaaradda Maaliyadda iyo Bangiga Horumarinta Africa.

“Safar gaaban ayaan ku tagay magaaladda Nairobi, waxaana ka soo qayb galay shir ay wada qaban qaabiyeen Wasaaradda Maaliyadda Soomaaliya iyo Bangiga Horumarinta Africa, waxaan u jedkiisu ahaa sidii loo hormarin lahaa kaabayaasha dhaqaalaha dalka, Dhinaca Jjidadka Isgaarsiinta, Biyaha, iyo korontada, shirkaas ahmiyad gaar ah ayuu u lahaa Soomaaliya. Waxaana ka warqabnaa in dalku mudo ku tiirsanaa deeqo uga yimaada caalamka, taa badalkeedana waxaan codsanay si dalku u helo dhaqaale in la hormariyo kaabayaasha dhaqaalaha, waxayna ka soo qayb galayaasha shirku muujiyeen iney hada muuqato kalsooni badan oo lagu qabo dowladda Soomaaliya, lana gaaray xiligii wax lagala qaban lahaa horumarinta dalka” ayuu yiri Wasiirku

Wasiirka ayaa sidoo kale sheegay inuu kulan muhiim ah kula qaatay Wasiirada Maaliyadda ee Maamulada Goboleedyada dalka, waxayna ka wada hadleen qorshe balaaran oo Wasaaradu ay doonayso in laga wada xaajoodo sidii loo midayn lahaa canshuurada dalka, loogana fa’iidayasan lahaa barnaamijka maaraynta maamulka maaliyadda.

“Shirkaan qabsoomidiisu wasaaradu waxay ku bixisay waqti, wuxuuna xambaarsan yahay ahmiyad gaar ah taas oo horseedi karta wada shaqayn buuxda oo dhex marta dowladda dhexe iyo maamuladda goboladda, waxaana ka soo qayb galay Wasiirada Maaliyadda Maamuladda Puntland, Jubaland, South west, iyo Galmudug, shirkaan waa kii ugu horeeyey oo dhaca, wuxuuna isugu jiray isbarasho iyo gogol xaar shir balaaran oo ka dhici doona magaaladda Muqdisho, waxaa kale oo aan ka wada hadalnay sidii xiriir joogta ah loo yeelan lahaa, laysaga kaashan lahaa nidaamka cusub ee ay wada Wasaaradda Maaliyadda oo ku salaysan dib u habaynta maareynta maamulka Maaliyadda, oo runtii u dub dhexaad u ah isla xisaabtaan iyo la dagaalanka musuq maasuqa” ayuu yiri Wasiir Farketi

Kulankaan ayaa wasaaradu uga gol leedahay sidii ay wada shaqayn buuxda u lahaan lahaayeen maamulada gobolada iyo Wasaaradda Maaliyadda si looga fa’iidaysto mashaariicda Bangiga Aduunku ku caawinayo dib u habaynta maamulka maaliyadda dalka.